



Lambarada Social Security ee dadka aan wadanka udhalan

Miiska ku jira

Qof aan muwaadi ahayn ma ubaahanyahay lambarka Social Security?	1
Sidee ayaan kuheli karaa lambarka iyo kaarka Social Security?	2
Maxaan ubaahnahay inaan geeyo xafiiska Social Security?	2
Goorma ayaan codsanaya?	3
Waa meeqa qiimaha codsashada lambarka iyo kaarka Social Security?	3
Maxaa dhacaaya hadaan lambarka urabo sababo kale?	3
La Xiriirka Lambarka Bulshada	4

Qof aan muwaadi ahayn ma ubaahanyahay lambarka Social Security?

Illaa inaad tahay maahee muwaadin aan dalka udhalan oo doonaaya inuu kashaqaysto United States, caadiyan uma baahnid lambarka Social Security.

Si guud, kaliya dadka aan wadanka udhalan ee xaqa uleh inay kashaqaystaan United States ayna u ogaalatay Department of Homeland Security (DHS) ayaa heli kara lambarka Social Security. Lambarada Social Security waxaa loo adeegsadaa in dawladu ku ogaato mushaarka qofka iyo in lagu go'aansho xaqa uu qofku uleeyahay gunooyinka Social Security. Waxaad ubaahantahay lambarka Social Security si aad shaqo uhesho, aadna uqaadato gunooyinkaaga Social Security, unahesho adeegyada kale ee dawlada.

Dadka aan wadanka udhalan ee sharciga kukooga waxay heli karaan gunooyin iyo adeegyo badan ayagoon haysan lambarka Social Security. Uma baahnid lambar si aad uhesho ruqsada gaariga, iskagana qorto dugsi, aad uhesho caymis caafimaad oo gaar looleeyahay, ama aad codsato barnaamijyada qadada dugsiga ama lacagta guryaha lagu kabo.

Ururada qaar ayaa u adeegsada lambarada Social Security si ay kuugu aqoonsadaan markay diiwanadooda baarayaan. Hase yeeshie, inta badan, waxay kugu aqoonsanayaan qaabab kale hadaad codsato.

Kuma siin karno lambarka Social Security si kaliya aad ruqsada darawalnimada ugu qaadato ama adeeg ubaahan jeega kaarka daynta.

Inkastoo shirkado badan, sida bangida iyo shirkadaha daynta bixiya, ay kaadalban karaan lambarka Social Security, si guud lagaagama doonaayo inaad lambarka keento hadaadan haysan.

Sidee ayaan kuheli karaa lambarka iyo kaarka Social Security?

Hadaad tahay qof soogalooti ah, waxaad kucodsan kartaa labo qaab:

- Wuxuu kacodsan kartaa wadankaagii hooyo kahor intaadan sogalin United States markaad codsanayso fisaha dal kugalka dadka soogalootiga ah the U.S. Department of State. Inta badan, hadaad codsato lambarka Social Security iyo kaarka markaad dirsanayso fiisaha soogalitaanka wadanka, uma baahnid inaad booqato xafiiska Social Security ee kudhexyaala United States. (Wixii macluumaad dheeri ah, kafiiри www.socialsecurity.gov/ssnvisa); ama
- Wuxuu booqan kartaa xafiiska Social Security si toos ah. (Kafiiри qaybta hoose waxaad ubaahantahay inaad gayso markaad tagto xafiiska Social Security).

Hadaad tahay qof aan soogalooti ahayn, waxaad kucodsan kartaa labo qaab, waxayna kuxirantahay hada xaalada fiisahaaga:

- Hadaad sifo sharci ah kujooqto United States aadna qorshaynayso inaad fasax shaqo kacodsato DHS, U.S. Citizenship and Immigration Services (USCIS), waxaad kucodsan kartaa barnaamijaaga SSN isla foomkii codsiga ee USCIS I-765 (*Application for Employment Authorization*). (Wixii macluumaad dheeri ah, kafiiри www.ssa.gov/ssnvisa/ebe.html).
- Hadaad sifo sharci ah kujooqto wadanka United States xaaladaada fiisahuna kuu ogolaanaayo inaad shaqayso, markaas waxaa qasab ah inaad tagto xafiiska Social Security si toos ah si aad markaas lambarka ucodsato.

Maxaan ubaahnahay inaan geeyo xafiiska Social Security?

Waxaad ubaahantahay inaad cadayso aqoonsigaaga iyo xaaladaada aqoonsiga ee socdaalka.

Si aad ucadayso aqoonsigaaga iyo xaaladaada fasaxa shaqada, natus dukumiintiyadaada aad kujooqto Maraykanka ee socdaalka iyo baasaboorkaaga shisheeye ee aan wali dhicin. Dukumiintiyada socdaalka ee la aqbalo waxaa kamida ah:

- Foomka I-551 (*Kaarka Daganaanshaha Rasmiga ah, Fiisada Mashiinku Akhrin karo ee Soogalootiga*);
- Tiinbaraha soogalitaanka oo muujinaaya fasaxa shaqadaada;
- Foomka I-94 (*Arrival/Departure Record*); ama
- Foomka I-766 (*Employment Authorization Document/EAD*).

Isweedaarsiga Martida: Hadaad tahay J-1 ama J-2 isweedaarsiga martida, Waxaan sidoo kale ubaahanahay inaan aragno aqoonsigaaga DS-2019, *Certificate of Eligibility for Exchange Visitor Status* ama *EAD*. Hadaad tahay arday kujira J-1, arday wadanka waxbarasho uyimid, ama qof booqasho caalami ah kuyimid, waa inaad waraaq kalatimaadaa cidii kukeentay. Waraaqda waa inay lasocotaa astaanta cida kukeentay uuna kuyaalaa saxiixa dhabta ah ee fasaxaaya shaqadaada.

Ardayda caalamiga ah: Hadaad tahay ardayda F-1 ama M-1, waa inaan aragnaa foomkaaga I-20, *Certificate of Eligibility for Nonimmigrant Student Status* ama waraaqda Designated School Official (DSO). Wixii macluumaad dheeri ah ee laxariira dukumiintiyada kale ee ardaydu keenayaan, dalbo *Lambarada Ardayda Caalamiga ah Iyo Social Security* (Lambarka Daabacaada. 05-10181-SO).

Waa inaad cadaysaa da'daada.

Waa inaad soogudbisaa shahaadadaada dhalashada ee wadanka shisheeye hadaad haysato ama aad kukeeni karto 10 maalmood gudahood. Hadaadan haysan, waxaan qaadan karnaa dukumiintiyada kale, sida baasabookaaga aan dhicin ama dukumiintiga ay kuusamaysay DHS, kuwaasoo aan u qaadan karno cadaynta da'daada.

Waxaad ubaahantahay inaad codsi buuxiso.

Waxaad buuxinaysaa *Codsiga Kaarka Social Security* (Foomka SS-5). Waxaad codsigaan kubuuxin karaa xafiiska Social Security ama waxaad kahelaysaa nuqulka foomkaan webseetkeena adoo daabacan kara soona qaadan kara.

Arin Muhiim ah: Dhamaan dukumiintiyadu waa inay ahaadaan kuwii asalka ahaa ama nuqulo ay soo ansixisay wakaaladii soosaartay. Ma aqbali karno nuqulada ama nuqulo lasoo qoray ee dukumiintiyada. Sidoo kale ma aqbali karno rasiid muujinaaya inaad dukumiintiga codsatay.

Waxaan hal dukumiinti u adeegsan karnaa labo ujeedo. Tusaale ahaan, waxaan u adeegsan karnaa dukumiintigaaga DHS EAD inuu noqdo cadaynta aqoonsigaaga iyo xaalada socdaalkaaga fasaxa shaqada labadaba. Shahaadadaada dhalashada ama baasabookaaga ayaa cadayn unoqon kara da'daada. **Hase yeeshay, waa inaad ugu yaraan keentaa labo dukumiinti oo kaladuwani.**

Goorma ayaan codsanayaa?

Waxaan kugu boorinaynaa inaad sugto ugu yaraan 10 maalmood kadib markaad soogasho wadanka United States si aad ucodsato lambarka Social Security si ay noogu fududaato inaan xaqijino dukumiintiyadaada DHS si oonleen ah, taasoo kor uqaadaysa xawaaraha shaqada codsigaaga lambarka Social Security.

Waxaan boostada kuugusoo diraynaa lambarka kaarkaaga Social Security islamarka aan helno dhammaan macluumaadka aana kaxaqijino dukumiintiyadaada xafiisyadii soosaaray.

Waa meeqa qiimaha codsashada lambarka iyo kaarka Social Security?

Codsashada lambarka iyo kaarka Social Security waa mid lacag la'aan ah.

Maxaa dhacaaya hadaan lambarka urabo sababo kale?

Hadaadan fasaxa shaqada kahaysan waaxda DHS si aad uga shaqayso gudaha United States, waxaad kaliya kuheli kartaa lambarka Social Security hadaad cadayso inaad ugu baahantahay kaarka sabab sax ah oon shaqo ahayn. Taas way dhici kartaa, tusaale, hadaad sharciga gobalka ama kan federalku kaadoonaayo inaad haysato lambarka Social Security si ay kuusiyaan gunooyinka aad marhoreba xaqa uyeelatay.

Hadaad ubaahantahay lambarka sababo dhanka canshuurta awgood ah, aadana fasax uhaysan inaad kadhhexshaqayso wadanka United States, waxaad kacodsan kartaa aqoonsiga canshuurta ee *Individual Taxpayer Identification Number (ITIN)* wakaalada Internal Revenue Service (IRS). Si toos ah ubooqo IRS, ama wac lambarka lacag la'aanta ah ee IRS, **1-800-TAXFORM (1-800-829-3676)**, kadibna kacodso foomka W-7, *Codsiga Lambarka Aqoonsiga Shaqsiga ah ee Canshuurta*.

Hadaad goob ganaci ama wakaalad dawladeed ay kuwaydiisato lambarka Social Security aadana fasax uhaysan inaad kadhhexshaqayso wadanka United States, kadalbo inay qaabab kale kugu aqoonsan karaan. Inta badan, waxaad awoodi doontaa inaad adeegyada hesho ama ruqsada qaadato adoon haysan lambarka Social Security.

La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan 80, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda www.socialsecurity.gov. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my Social Security xisaab* oo aad kala socoto *Social Security Statement (Warbixinta Lambarka Bulshada)*, ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqijinta macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;
- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (*Extra Help*) ee ku saabsan daawada laguu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawl gabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqlu ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;
- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka

caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tiihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneysso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Wuxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Wuxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.



Securing today
and tomorrow

Social Security Administration

Publication No. 05-10096-SO | March 2018

Lambarada Social Security ee dadka aan wadanka udhalan

Social Security Numbers for Noncitizens (Somali)

Produced and published at U.S. taxpayer expense

Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha